

Ku-ganacsiga Goob Dagaal: Bangiyada iyo Shirkadaha Is-gaarsiinta

Muhiimka macluumaadka lasoo helay:

1. Bangiyada iyo shirkadaha is-gaarsiintu diyaar bey u yihiin weyna ku dhaqmi karaan hab-maamul heerkiisu sarreeyo, balse dowladda ayaa daciif ah oo aan awoodin diyaarintooda iyo fulintoodaba.

2. In kastoo shirkadaha is-gaarsiinta lagu eedeeyo inay diideen ku-dhaqanka Xeerka Is-gaarsiinta, haddana shuruucda ugu muhiimsan ee aan la hirgelin waa kuwa u baahan gacan dowladeed, waxaana ugu muhiimsan hirgelinta habka aqoonsiga qaranka iyo xoojinta ammaanka.

3. Shirkadaha is-gaarsiintu wey la qabsadeen inay ganacsigooda ku dhex kobciyaan xaaladda ammaan ee Soomaaliya, weyna joojiyeen adeegyada rugaha iyo ururinta macluumaadkaba.

4. Shirkadaha is-gaarsiintu xataa macaamiisha ayey ku adkeeyeen inay tixraacaan wicitaannadoodii hore, si aysan hayadaha dowladdu ayaguna u sameynin codsiyo noocaas ah.

5. Sirdoonka Qaranku (NISA) ma aaminsana inay shirkadaha is-gaarsiinta iyo bangiyadu lacago siiyaan kooxaha argagixisada ah.

Warbixin Kooban

Ganacsiga Soomaaliya waxaa aalaaba xukuma xaaladda amni iyo midda dowladeed. Ganacsiyada waaweyn ee dalku waxay halgankooda soo billaabeen xilliyadii ugu madoobaa ee dagaalkii sokeeye. Waxay la qabsadeen xaaladaha waxayna ka qeyb qaateen asaaska soo nooleynta qarannimada Soomaaliyeed iyagoo isu furay xuduudihi u dhexeeyey qabiillada. Dalka oo hadda sii galaya sanadkiisii soddonaad ee qalaalaase siyaasadeed, ayaa haddana ganacsiyada Soomaalidu sii kobcaya qaaroodna ayba caalami noqonayaan. Waxay haddaba hadda noqdeen kuwo ay la xisaabtamaan awoodaha gudaha dalka iyo dibaddaba.

Qoraalkani wuxuu ka dhashay wareysiyo lala

yeeshay dhowr iyo toban qofood oo oo isugu jira maamulayaasha ganacsiyada iyo saraakiil sare oo dowladeed. Ujeeddadu waxay ahayd in la fahmo sida ganacsiyada waaweyn ee Soomaalidu ula jaan qaadeen jawiga cusub ee ganacsi, gaar ahaan sharcigi AML/CFT ee 2016 ee ka hortagga dhaqidda lacagaha sharcidarrada ah iyo la dagaallanka maalgelinta argagixisada iyo sharcigii Is-gaarsiinta Qaranka ee 2017. Gaar ahaan, waxaan dooneyney inaan ogaanno inay ganacsiyadu fuliyeen sharciyadaas iyo in kale, iyo sida looga jawaab celiyey sharciyadaas cusub.

Waxaa noo soo baxday inay ganacsiyada waaweyni dhowreen sharciyadaas oo ay badankoodu dhaqankaas billaabeen xilliyadii ay shaqada billaabeen. Bangiyadu waxayba hore u lahaayeen sharciga Baro Macmiilkaaga iyo habab kale oo ay kasii fikireen, inta aysanba dowladdu kusoo rogin. Maadaama ayba qeyb ka ahaayeen dhaqaale caalami ah, ayey hore ugu dhaqmi jireen halbeeyo caalami ah xataa haddii aysan dowladdu ku qasbin.

Waxaa sidoo kale la dersay ilaalinta macluumaadka iyo xogaha si loo cayimo wixii daldaloolo ah iyo meelaha u baahan in lasii wanaajiyo. Waxaa noo soo baxday in heynta iyo helista macluumaadku ay dadkii ku abuurtay dhaqan eed-ka-carar ah xaaladaha amni dartood. Dhankan, ganacsiyada ayaaba sanado ka horreeya dowladda; Soomaaliya ma lahan sharciyada ilaalinta macluumaadka, mana muuqdaan kuwo soo socda.

Dhinaca Bangiyada

Soomaaliya waxaa ku yaalla shan bangi oo waaweyn: Salam Bank, Amal Bank, Dahabshiil, Premier Bank, iyo IBS. Bangigi ugu horreeyey ee 1991 kaddib laga furo Soomaaliya wuxuu ahaa Salam Bank (SB), kaasoo si rasmi ah loo furay 2009. Maadaama uu jirey kahor intaan la sameyn wax sharciyo ah ee bangiyada dalka iyo hab-maamul la raaco toona, ayaa wuxuu bangigu ku qasbanaa inuu raaco shuruucda caalamiga ah ee bangiyada si uu dunida ula ganacsado. Jiritaan la'aanta sharciyo bangi ee qaran darteed, waxay bangiyada

Soomaaliya badankoodu xeerarkooda ku saleeyeen xeerka **Financial Action Task Force (FATF)** inta aysan qaadan sharciga Somaliyeed ee AML/CFT ee 2016. Sharciga AML/CFT wey ku faraxsan yihiin bangiyadu fulintiisa wuxuuna ka caawiya helista sharciyad caalami ah; Dowladda waxay qiyaaseysaa in Al Shabaab (AS) aysan bangiyada ku ciqaabeeynin inay sharciyada addeecaan maadaama aysan ku ciqaabin bixinta canshuuraha dowladda.

Iyadoo aan lagu soo rogin sharci Soomaaliyeed, ayaa waxaa SB macaamiishooda ku xirtay inay keenaan baasaboorradda iyo diiwaanka shirkaddooda inta aysan koontada furan. Shacabku wuu diiddanaa habkaas diiwaan gelinta, waxaase inay aqabalaan door weyn ka cayaartay SB. Waxaa markii hore SB lagu eedeeyey basaasnimo maadaama ay macaamiishi ku xireen aqoonsiyo sawirro leh si ay koonto u furtaan.¹ Sidoo kale, IBS waxay iyana leedahay mid ka mid ah shuruudaha ugu adag ee furashada koontada cusub, oo waxay macaamiisha ku xirtay inuu bangigu faro ka qaado; waxay xataa macaamiisha ka baartaa liisaska OFAC si ay u hubiso in dadka koontada cusub furanaya aysan ahayn kuwo ay qabanayaan cuno qabateynta caalamiga ah.²

Maadaama ay ganacsiyadooda ku dhiseen jawi aan lahayn hab dowladeed oo shaqeynaya, ayaa waxaa jira shakhsiyaad urursaday maal aad u faro badan ayagoo aan diiwaan gelin shirkadahooda. Markii la amray inay diiwaan geliyaan shirkadahoodana, aad ayey uga soo horjeestaan oo waxay shaki ka qabaan inay bangiyadu hoosta kala shaqeynayaan wasaaradaha qaabilsan diiwaan gelinta.³

Bangiyada oo dhami siyaabo kala duwan ayey dowladda ugu sameeyaan adeegyo lacageed, oo ay ka mid yihiin adeegyada bixinta mushaarrada iyo soo ururinta lacagaha khidmada ah ee dowladda. Inkastoo ay xiriirka qotada dheer iyo caawinaad dhaqaalaba la leeyihiin dowladda, haddana wax handadaad ahi bangiyada ugama iman AS. Sababtu waxay tahay in aysan kooxdu ku ciqaabin bixiyeyaasha adeegyada bulshada inay dowladda u sameeyaan isla adeegyadaas. Taasi waa sababta ay u beegsadaan qandaraaslayaasha dhismaha ee xafiisyada u dhisa dowladda una dhaafaan kuwa waddooyinka dhisa maadaama ay adeegyadan dambe yihiin kuwo ay shacabku adeegsadaan.⁴



Bangiyadu waa oggol yihiin xisaabi xil maleh (audits) iyadoo ujeeddadoodu tahay u hoggaansanaanta sharciga. Si kastaba, bangiyadu ma aaminsana inay dowladdu ilaalin karto xogaha ay la wadaagayaan, waxayna ka walaacsan yihiin ciqaabaha uga iman kara kooxaha argagixisada ah haddii ay xogahaasi bannaanka yimaadaan. Welwelka bangiyadu wuxuu ku salaysan yahay khidradihii kasoo maray saraakiishi dowladihii hore iyo baratanka awoodeed ee hadda ka dhex jira Xarunta Warbixinta Ganacsiga (XWG) iyo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya (BDS).

XWG iyo BDS

Xeerka AMLF/CFT waxaa ku cad waxaa labada hayadoodba ay ka heli karaan bangiyada; waxayse u muuqataa in BDS uu bangiyada ku qasbayo inay usoo gudbiyaan xog la mid ah tan ay la wadaagaan XWG. Bangiyadu way ku kalsoon yihiin BDS inuu xafidayo macluumaadka ay la wadaagaan kumana xirin wax shuruud ah; halka ay XWG ku xireen inay horta sameysato hab ammaan ah oo ay kula wadaagaan macluumaadka. Sababtu waxay ahayd kalsooni soo-jireen ah oo ay u hayeen BDS ee ma ahayn qalad ay gashay XWG.

Intii lagu jirey cilmi-baaristaan, waxay XWG ku dhex jirtey sidii ay ku sameyn lahayd hab ammaan ah oo macluumaadka lagula wadaago, laakiin madaxda bangiyadu ma rumeysna inay XWG leedahay hab ammaan ah amaba aaladaha lagula socdo dhaqdhaqaaqa shaqaalahooda si loola socdo macluumaadka ay helaan ama daabacdaan.⁵ Dhanka kale, BDS aad ayay u ixtiraamaan bangiyadu; waxay kalsooni ku qabaan kartida iyo xirfadda shaqaalahooda, sida ay sheegeen dhawr qof oo ka tirsan madaxda bangiyada kala duwan. Waxay sababtu u badan tahay khibraddoodi wada shaqeyneed ee BDS oo aysan ahayn inay wax ka qaldan yihiin XWG. Bangiyadu waxay ku dhex wareereen hardankan awoodeed ee ka dhexeeya

1 Wareesi la yeelaney madaxa Salam Bank, Desember 2018.

2 Wareesi la yeelaney madaxa IBS, December 2018.

3 Wareesi la yeelaney madax Salam Bank, Desember 2018.

4 Waxee bartilmaameed ka dhigteen qandaraas layaasha dhismaha ee dowladda u adeega.

5 Ibid.

labadan hayadood, waxayn u muuqataa inay la safteen midkii ay doorbideen.

Waxaa intaas dheer, inay jiraan jaho-wareer iyo arrimo kale oo ka dhashay XWG ama BDS middoodi noqon lahayd **compliance agency**. Qaar ka mid ah shaqaalaha BDS ayaa sheegay in aysan weli muuqan halka ay XWG ka galayso habka warbixinta iyo inayba xaq u leedahay inay iyadu warbixin siiso BDS ama Wasaaradda Maaliyadda.⁶ Jaho-wareerkan ka dhashay hab-maamuleedyada labadan hayadood ee wada sheeganaya masuuliyaddaas iyo iyagoo eed-ka-carar ah dartood, ayaa waxay bangiyadu ku qasbanaadeen inay lacagaha laga shakiyo u wada diraan XWG iyo BDS labadaba. Si haddaba loo yareeyo jaho-wareerkan, ayaa waxay XWG hadda bangiyada u tababbareysaa habka **compliance procedures**.⁷ Si kastaba, bangiyada qaarkood way fahamsan yihiin sharciga waxayna warbixinno kala duwan u kala diraan XWG iyo BDS; qaar kalana waxaa lagu qasbay inay lacagaha laga shakiyo iyo kuwa uu cadadkoodu badan yahayba usoo gudbiyaan XWG iyo BDS labadaba.⁸ Maadaama ay bangiyadu si aan qasab ahayn ugu hoggaansan yihiin sharciyada, ayaa XWG iyo BDS labaduba waxay ku faraxsan yihiin heerka wada shaqeyneed ee ay ka helaan bangiyada, waxayna u arkaan inay fuliyaan sharciga AML/CFT.

Shirkadaha Is-gaarsiinta

Shirkadda ugu weyn ee is-gaarsiinta Soomaaliya waa Hormuud, taasoo sheegata inay heysato 75% suuqyada gobollada Koofureed iyo kuwa gobollada dhexe iyadoo 50% macaamiishoodu ku sugan yihiin Muqdisho. Si kastaba, waxaa shirkadaha kale ee is-gaarsiintu ku eedeeyaan inay qeybteeda suuqyadu ayba intaas kasii badan tahay oo ay weliba ku takri fasho awooddeedaas. Hormuud waxaa 2002 aasaasay ganacsato maxalli ah iyo shaqaalihii ka haray burburkii Al-Barakaat. Waxay ka shaqeysaa Koofurta iyo Bartamaha Soomaaliya iyadoo wada shaqeyn la leh shirkadaha Golis iyo Telsom. Hormuud waxay shaqo billowday intii aan dib loo yagleelin dowlad Soomaaliyeed; waxaa ku qasbanaatay inay la qabsato ganacsiga iyo jawiga caalamiga ah ee siyaasadeed inta aysan dowladdu sharcio u sameynin hawlaheeda.⁹ Sanadihii 1990-meeyadi wuxuu amnigu ahaa mid la saadaalin karo oo ku shaqeeyaa xuduudaha qabiillada. Shirkadaha is-gaarsiintu waxay muhiim u ahaayeen ka

gudbiddi dalku ka gudbay xuduudihii qabiileed kaddib markii ay shirkadaha ku qasbeen inay ka shaqeeyaan meelo dhaafsiisan xuduudaha qabiilka iyagoo weliba saldhigyo joogto ah ka sameystay meelahaas.¹⁰ Amnigu wuxuu weligiis ahaa welina yahay adeegga ugu qaalisan ee shirkadaha is-gaarsiinta soo wajaha. Baabuur tekniko ah ayaa daruuri u ahaa sugidda amniga madaxda shirkadda iyo ilaalinta baabuurtooda xamuulka. Xuduudaha qabiillada dartood, waxaa daruuri ahayd oo ay weliba odayaasha qabiilku ku adkeysteen in xarun walba laga shaqaaleeyo dadka degaanka ah.

Maadaama aysan dowladi jirin, shirkadaha is-gaarsiintu waxay lahaayeen xafiis mideysan oo u wada ahaa **clearing house** u matalayey guddiga maamulka guud. Wuxuu xafiisku go'aaminayey lacagta khidmada is-wicitaanka shirkadaha iyo weliba qeybinta mawjadaha. Si kastaba, hadda shirkadaha is-gaarsiintu ma lahan hab ay macaamiishoodu isku wici karaan oo waxaa meeshi ka baxay xafiiskoodi maamulka guud taasoo ka dhalatay tartanka iyo aammindarrada dhexdooda ah.

Kalsooni darrada iyo maqnaanshaha maamul guud oo ka wada dhexeeya waxaa sare u kac ku yimid qiimaha adeegga maadaama shirkadaha waaweyni ku qasbanaadeen inay shuruuc kala duwan ku kala dhaqmaan degaanno ay baaxaddoodu yar tahay dhexdooda. Tusaale ahaan, baabuurka xamuulka ee Hormuud waxaa laga rabaa inuu lacago baad ah ka bixiyo dhowr meelood oo u dhexeeya Muqdisho iyo Afgooye.¹¹ Sidoo kale, dowladdu ma joogto mana awooddo inay ilaaliso siimanka(MASTS) Hormuud ee ku yaalla gobollada ku yaalla xuduudka Kenya, halkaasoo ay ciidamada Kenya si joogto ah ugu burburiyaan siimanka (MASTS) shirkadda. **Waxaaba kasii daran, ma jiro baaq sare oo dowladeed oo ku saabsan weerarka shirkadaha khaaska ahi kala kulmaan awood shisheeye.** Hormuud waxay ku andacooneysaa inay malaayiin doollar kaga lumen weerarradaas Keenyaatiga.



6 Wareesi la yeelaney mas'uul BDS, Desember 2018.

7 Wareesi la yeelaney mas'uul sare XWG, Desember 2018.

8 Wareesi la yeelaney dhowr mas'uulin sare ee bangiyada Xamar, Desember 2018.

9 Wareesi la yeelaney madaxa Hormuud, Desember 2018.

10 Wareesi la yeelaney madaxa Nationlink, Desember 2018.

11 Wareesi la yeelaney madaxa Hormuud, December 2018.

Maadaama ay ugu weyn tahay shirkadaha is-gaarsiinta, waxaa Hormuud soo wajaha tirada badan ee cadaadisada ka dhasha hardanka awoodaha kala duwan ee colaadaha Soomaaliya. Tusaale ahaan, AS waxay shirkadda ka hor istaagtaa dhisidda anteenoyinka cusub waxayna dhibaateysaa baabuurtooda xamuulka. Sidoo kale, awoodaha is haya oo dhan—AS/DFS/DGS/AMISOM—waxay mararka qaarkood damiyaan anteenoyinka Hormuud ee ku taxan jidadka ay ciidammadoodu ka hawl galayaan. Qeybo ka mid ah Gobolka Hiiraan waxayba AMISOM anteenoyinkan damisaa maalin walba oo qaarkood gaarayo muddo 5 saacadood ah. Waxyaabahani waxay saameeyaan malaayiin macaamiil ah waxayna sanad walba qasaariyaan malaayiin doollar oo faa'iido noqon lahaa.¹²

Xeerka Shirkadaha Is-gaarsiinta ee 2017

Sanadka 2017, ayaa aakhirii Baarlamaanku ansaxiyey xeerka is-gaarsiinta Madaxweynuhuna saxiixay. Waxay tani shirkadaha is-gaarsiinta u abuurtay wakaalad **hagta** taasoo kusoo rogtay in la diiwaan geliyo SIM kaarrada dalka oo dhan. Shirkaduhu muddo sanado ah ayay ka dhiidhinayeen xeerkan. Waxay quud-daraynaayeen oo aamindarro ka qabeen inay dawladdu macluumaadkooda la wadaagaan dad aysan aqoonin. Waxay aaminsanaayeen in saraakiisha dowladda oo dhami wada yihiin kuwo qurbaha ka yimid oo aan la socon xaaladda dhabta ah ee dalku ku sugan yahay; in aysan fahamsaneyn oo aysan xal macquul ah u heyn arrimaha gaarka u ah Soomaaliya.¹³ Ganacsadihii la qabsaday inuu la macaamiloo shacabka degaanka ah, ayaa waxaa baqdin geliyey la dhaqanka dowlad federaal ah iyo sharciyadeeda. Hormuud waxaa lagu eedeeyaa inay ahayd caqabaddii ugu weyneyd ee hor taagneyd ansaxinta xeerka is-gaarsiinta. Waxayse iyadu ku andacootay in aysan iyadu marnaba kasoo horjeesan hirgelinta xeerka is-gaarsiinta, kaasoo toban sano Baarlamaanka ku qaadatay inuu saxiixo; waxayna ku eedeeyneysaa degganaansho la'aanta madaxda DFS inay sabab u ahayd dib-u-dhigista ansaxinta xeerkaas.

Maamulka Is-gaarsiinta Qaranka (MIQ)

MIQ waa hay'adda maamulka ee masuulka ka ah fulinta Xeerka Is-gaarsiinta Qaranka ee 2017. Waxay ka shaqeysaa ilaalinta xuquuqda macmiilka iyo dhiirrigelinta dhaqan ganacsi oo caddaalad ah. Si kastaba, shirkadihi is-gaarsiinta ee aan lagu darin **BoD**-ga **MIQ** waxay Hormuud ku eedeeyeen inay si

aan toos ahayn u xukunto shakhsiyaadka ku jira MIQ. Si kastaba ahaatee, MIQ waa ay qirsan tahay inay Hormuud mug weyn ku leedahay xulashada **BoD** sababtuna ay tahay xajmiga ay suuqa ku leedahay; waxaa la sameeyey wada tashiyo ku saleysan saamiga suuqa.¹⁴

Shirkadaha is-gaarsiintu muddo sanado ah ayey ka dhiidhinayeen xeerkaas iyagoo weliba hor istaagay hirgelintiisa labo sababood oo ay ka walaacsanaayeen awgood; soo gelista shirkadaha shisheeye ee Soomaaliya iyo la'aanta aqoonsiga qaran ID. Waxay ugu dambeyntii aqbaleen sida uu hadda yahay kaddib marki la xalliyeey labadaas sababood. Walaacoodii ku saabsanaa maal-gashiga shisheeye waxaa xalliyeey Xeerka Maal-gashiga 2016; sidoo kalana, arrintii aqoonsiga ID-yadana waxaa la xalliyeey kaddib markii ay wada hadleen dowladda iyo shirkadaha is-gaarsiintu halkaasoo ay labada dhinacba ku heshiiyeen in dib loo dhigo fulinta xeerkaas inta laga helayo aqoonsiga qaran ee ID.¹⁵

MIQ waxay shirkadaha is-gaarsiinta kusoo rogi doontaa inay sameystaan ruqsado cusub wixii ka billowda Janaayo 2019; waxay tani rasmi ka dhigi doontaa lambarintooda iyo mawjadaha ay hadba adeegsanayaan. **Dowladda iskeed isu magacowday ee Somaliland ayaa iyana sii cakiraysa xaaladaha murugsan, balse shirkadaha halkaas ka shaqaysta waxay ku qasbanaan doonaan inay is diiwaan geliyaan si ay u adeegsadaan habka qaranka ee lambareynta.**

Diiwaangelinta

Caqabadda ugu weyn ee hortaagan xeerka is-gaarsiintu waa la'aanta aqoonsiyada (IDs) qaranka iyo awood la'aanta dawladeed Soomaaliya inteeda badan. Haddii ay xaaladda hadda lagu jiro dawladdu sameyso aqoonsiyada qaranka, suurogal uma noqoneyso shirkadaha is-gaarsiinta inay shacabka ku nool meelaha ka baxsan xarumaha waaweyn ee dadku u badan yahay is diiwaan geliyaan, taasoo ku qasbi doonta inay shaqo joojin ka sameeyaan meelo badan oo dalka ka mid ah. Shirkadaha is-gaarsiintu way doonayaan inay ku dhaqmaan shuruucda, balse uma suuro galayso inay fuliyaan sharci faraya inay diiwaan geliyaan macaamiisha adeegsada SIM kaarrada inta uu dalku yahay mid aan lahayn habka aqoonsiga qaranka ID; waa inay DFS kasoo baxdo doorkeeda kaga aaddan diiwaangelinta macaamiisha SIM kaarrada; waa inay

12 Ibid.

13 Ibid.

14 Wareesi la yeelaney mas'uul ka tirsan MIQ.

15 Wareesi la yeelaney MIG, Desember 2018.

sameyso kaararka aqoonsiga qaranka.¹⁶ Inkasta oo ay shirkadaha is-gaarsiintu dowladda la leeyihiin xiriir aad u wanaagsan kuna dhaqmaan shuruuddooda, waxay haddana shirkaduhu dareensan yihiin inay DFS ku fashilantay waajibki ka saarnaa nabadeynta dalka iyo wanaajinta jawiga ganacsiga.¹⁷

Maqnaanshaha kaararka aqoonsiyada shakhsiga waxay xataa saameyneysaa qeybta bangiyada; waxay dhaawacaysaa awooddooda maaleynta, waxayna sababeysaa inay tiro aad u yar oo dadka ka mid ahi furtaan koontooyinka bangiyada. Tusaale ahaan, habka bangiga ee online ah waxaa lagu saleeyey Doollarka u rogmaya Yuurada (**from dollars to Euros**) taasoo ilaalineysa shuruudihii Maraykanka ee Soomaaliya ku xiray inay horta yeelato kaarka aqoonsiga qaran, haddii la doonayo in la diro ama la helo lacagaha doollarka ah.¹⁸ Maqnaanshaha kaarka aqoonsiga qaran ma dhaawacayso oo keliya sidii ay bangiyadu u kordhisan lahaayeen tirada macaamiishooda, balse waxaa kale oo ay dhaawacaysaa sidii ay macaamiisha hadda koontooyinka ku leh bangiyadu ay uga faa'iideysan lahaayeen ganacsiyada caalamiga ah.

KAARKA AQOONSIGA SHAKHSIGA

Lacagaha Mobiilka

Sanadkii 2009, ayaa shirkadaha Hormuud, Golis iyo Telesom waxay Soomaaliya keeneen adeegga lacagaha mobiilka. Adeegga Zaad ayaa looga aqoon jirey Hormuud iyo Telesom, halka shirkadda Golis iyadana looga yiqiin adeegga Sahal. Si loo furto koonto, macaamiisha waxaa lagu xirey inay keenaan magacyo sax ah, qof damiin ka noqda, iyo weliba sawir ay shirkaduhu ka qaadaayan qofka. Macaamiishu waxay SIM kaarkooda u adeegsanayeen sidi bangiyo oo kale, iyadoo weliba dooran kara xadka koontadooda oo gaarsiin kara xadkii ay hadba doonayaan. Muddo gaaban kaddib marki la hirgeliyey adeeggaas, ayaa waxaa awoodlayaashii Muqdisho sida Al-Shabaab billaabeen inay kasoo horjeestaan shuruudaha lagu xiray furashada koontada Zaadka. Zaadka Hormuud waxay shuruuddiisu ahayd inay dadku keenaan macluumaad sawir leh si ay u adeegsadaan lacagaha elektroonigga ah; shacabku shaki bey shuruuddaas ka muujiyeen.¹⁹ Gadaal ayaa laga joojiyey adeegsiga sawirrada, waxayna natiijadu noqotay inay Hormuud xadka Zaadka ku xannibto \$700 taasoo ka dhigtay koonto miskiin. Tani wey ku filnaan weydey Al-Shabaab, sidaas awgeedna waxayba adeeggi Zaad mamnuucday sanadkii 2010.

Sanadkii 2011, ayaa waxay Hormuud soo bandhigtay adeegga EVC+ iyadoo aan u sameynin xayeysiis badan. Wuxuu adeeggani ku saleysnaa hab kale, EVC, oo loo adeegsan jirey sidii uu lambar telefoon ugu wareejin lahaa lambar kale lacagta ku-hadalka. Sameysashada koontada EVC+ waa hab sahlan oo uu qof walba ka dhex sameysan karo telefoonkiisa; xadku waa \$150 marki habkan loo sameysto. In loo sii ballaariyo \$300 waxay u baahan tahay inuu macmiilku keeno magaciisa oo buuxa oo run ah. Waxay tani macno sameyneysaa markii uu macmiilku damco inuu koontadiisa EVC+ ku xiriiriyo bangiga isagoo adeegsanaya adeegga Deqton. Waxay tani u baahan tahay inay keenaan aqoonsiga ID oo ay soo saareen DFS/DGS ama baasaboora oo uu weliba bangigu sawir ka qaado qofka. Marka EVC+ asalkeedu waa koonto miskiin; balse inaad kasihi weyneyso koonto miskiinkaasi ma jebineyso xeerarka AML/CFT maadaama macaamiisha laga rabo inay keenaan aqoonsi rasmi ah.

Shirkadaha Golis iyo Telesom waxay weli ku dhaqmaan shuruuddoodi ahayd sawir iyo qof damiin ah si loo furto koontada lacagaha mobiilka. Waxaa kale oo ay weli leeyihiin koontooyinkii mobiilka ee aan xadka lahayn; waxay macaamiishu codsan karaan in xadka koontadooda la gaarsiyo hadba inta ay doonaan haddiiba ay heystaan lacagtii lagu buuxin lahaa xadkaas. Iyadoo macaamiisha lagu ogaan karo habka damiinka oo weliba lasoo heli karo kuwa dembiga kala qeyb qaatay, haddana dirista iyo helista lacagaha cadadkoodu badan yahay waxay xaqiijisey inay u fiican tahay habka ay canshuuraha u urursato kooxda **AS Sharqistan -- AS in Puntland**. Maadaama aysan kooxdu heysan meel ku habboon inay ganacsadayaasha ku qasbaan inay canshuuraha keenaan sida ay ku sameeyaan Koofurta, ayaa waxaa ganacsadayaasha la faraa inay canshuurta kusoo diraan adeegga lacagaha mobiilka ee Sahal.

Bangiyada qaarkood waxay dareensan yihiin in adeegga EVC+ uu caqabad ku yahay kobcidda qeybta bangiyada maadaama ay hal bangi ka doorbideyso kuwa kale; Salam Bank oo keliya ayaa loo adeegsan karaa in lacago lagu shubo amaba laga bixiyo EVC+. Sidoo kale, Hormuud uma oggolaato bangiyada kale inay adeegsadaan habkeeda farriimaha otomaatigga ah; tusaale ahaan, IBS wuxuu ku qasban yahay inuu adeegsado shirkad farriimaha ah oo Singapore ku taalla si ay farriimo qoraal ah ugu diraan macaamiishooda maadaama aan Hormuud u oggoleyn in kuwa la tartamaya Salam Bank ay adeegsadaan adeegyadeeda. IBS waxay rajeyneysaa inay MIQ ku qasabto Hormuud

16 Wareesi la yeelaney mas'uul sare Somtel, Desember 2018.

17 Wareesi la yeelaney mas'uul sare Somtel, Desember 2018.

18 Wareesi la yeelaney madaxa IBS, Desember 2018.

19 Wareesi la yeelaney madaxa Salam Bank, Desember 2018.

inay wax ka beddesho dhaqankeedaas.

BDS weli meel kama istaagin arrinta lacagaha mobiilka, inkastoo ay ugu yaraan \$200 milyan maalin walba keyd ugu yihiin lacagaha mobiilka.²⁰ Maareynta lacagaha mobiilku weli waa mid mareysa heer wada tashi ah. Soojeedimaha illaa hadda laga fikirayo waxaa ka mid ah in shirkadaha is-gaarsiinta lagu qasbo inay lacagaha mobiilka ka dhigaan lacago wareega oo run ah oo bangiga dhex yaalla.

Isku-xirnaanta

Xeerarka maamula isku-xirnaanshaha ee ay MIQ ka fikireyso hirgelintooda waxay caawinayaan sii waddida is-beddel la'aanta ah ee aan macaamiishu iska wici karin khadadka kala duwan ee shirkadaha. Waxay taasi shirkadaha is-gaarsiinta siineysaa xorriyad aad u badan oo u sahleysa inay sidey doonaan ka yeelaan qiimaha wicitaannada iyo xaalado kalaba. Haddii ay shirkadaha is-gaarsiintu dhab u doonayeen isku-xirnaanshaha, waxay taas sameyn lahaayeen mar hore.

Dhowrista Xogaha

Ganacsiyada is-gaarsiintu waa jireen kahor inta uusan jirin hab dowladeed dalka oo dhan; Muqdisho oo keliya ayaa lahayd tiro ka badan dersin oo ah hogaamiye kooxedyo oo mid walba ahaa awoodda ugu sarreeya aaggiisa. Shirkadaha is-gaarsiintu wey fahmeen inay u baahan yihiin xeerar adag oo ilaaliya xogaha si ay ugu dhex badbaadaan xaaladda amni ee Soomaaliya. Haddii ay shirkadi oggolaato inay shirkad kale ka codsato inay xogaha la wadaagto, waxaa shirkaddaasi muteysaneysaa ciqaab iyo inay shirkado kale iyaguna sameeyaan codsiyo noocaas ah. Wadaagista macluumaadku waxaa sii carqaladeynaya xaaladda amni ee Soomaaliya. Haddii ay soo shaac baxdo inay xogaha la wadaagayaan cid kale, waxaa dhacaysa inay sidoo kale cid walba soo codsato adeegsiga xogahaas. Dhammaan shirkadaha is-gaarsiintu wey diiwaan geliyaan wicitaannada soo gala iyo kuwa baxaba, waxayse macmiilka ka xaddidaan inuu helo keydka wicitaannadaas. Maamulka sare oo keliya ayaa muddo cayiman kaddib heli kara keydkaas wicitaannada. Agaasimeyaasha laamuhu waxay iyagu heli karaan macluumaadkaas ay macaamiishu maalintaas u baahan yihiin oo keliya, sida lacagaha ay mobiilka isku dhaafsadaan. Tusaale ahaan, macluumaadka EVC+ waxaa keydiya sistemka ugu yaraan muddo labo sano ah waxaase arki kara maamulka sare oo keliya. Balse macluumaadka ku saabsan dhaqdhaqaaqa EVC ee labadii ama saddexdii bilood ee u dambeeyey waa la tusi karaa macmiilka. Saraakiil khaas ah oo jooga

xafiis walba oo Hormuud ayaa muddo ilaa saddex bilood gaareysa heli kara macluumaadka EVC+ iyo xogaheeda. Si kastaba, inkastoo ay AS marnaba si rasmi ah u codsan wax macluumaad ah, haddana shakhsiyaad AS ah ayaa si toos ah xog u weydiistay shakhsiyaad u shaqeeya Hormuud. Markii ay shakhsiyaadkaas xogta la weydiistay ay diideen codsiyada AS, waxay shakhsiyaadki AS ku jawaabeen inay isku dayaan waxyeelleynta dhulalka shirkadda.

Sidoo kale, inkastoo ay bangiyadu heli karaan xogaha lacagaha oo AS ka anfaci lahayd ururinta canshuuraheeda, haddana ma jiro bangi si rasmi ah ay AS uga codsatay inay siiyaan macluumaadka lacagaha macaamiishiisa. Bangiyadu wey ku adkeeyaan cid walba oo aan ahayn qofka koontada leh inuu arko dhaqdhaqaaqooda lacageed. Tusaale ahaan, IBS, dad sharciyeysan ayaa arki kara dhaqdhaqaaqa lacageed ee bangiga iyagoo warqado rasmi ah kasoo diraya saxiixayaashooda shakhsiyaadkuna way soo codsan karaan dhaqdhaqaaqooda lacageed ayagoo adeegsanaya saxiixa farahooda; Qasnajiga fadhiya daaqaadda bangigu xataa ma arki karo dhaqdhaqaaqa lacageed haddii uusan macmiilku ka codsan.²¹ Koontooyinka Salaam Bank waxaa keliya oo la arki karaa marka macmiilku uu codsado dhaqdhaqaaqiisa lacageed markaas ayaa lambarka SIRTAA loogu soo dirayaa telfoonnadooda u diiwaan gashan; wuxuu macmiilku qasnajiga siinayaa lambarka SIRTAA, kaasoo kaddib uu qasnajiguheli karo macluumaadka koontadaas. Tallaabooyinkan adag ee sugitaanka dhowrista xogaha ee bangiyadu sameysteen ayaa u muuqda kuwo ka hortagay codsiyada AS.

Canshuuraha

Habka federaalka Soomaaliya wuxuu runtii noqday mid dhibaateynaya ganacsiga; **DGS** walba waxay u dhaqmaan sidi dal gaar ah — waxay canshuuro ka qaaddaa bangiyada iyo shirkadaha is-gaarsiinta si gaar ka ah DFS waxayna soo saartaa lacagaha khidmada ah ee warqadaha ruqsada. Waxaa ka jaho-wareer badan, wey isku soo laalaabtaan bangiyada dhexe ee DFS iyo Bangiyada Dhexee DGS, iyadoo bangiyada lagu qasbo inay sharciyo kala duwan ugu kala dhaqmaan gobollo kala duwan. Shirkadaha is-gaarsiinta si rasmi ah uma canshuurto DFS. HIQ ayaa hadda ku hawlan canshuurista shirkadaha is-gaarsiinta; waxaana weli wadatashi loogu jiraa dejinta sharciyada. Si kastaba, waxaa bangiyada lagu canshuuraa si waafaqsan xeerka canshuurta dakhliga, sida uu sheegay maamule bangi. Bangiyada gaaray heerka faa'iidada waa inay iyaguna bixiyaan canshuuraha faa'iidada. Hadda, waxaa heerka faa'iidada gaaray Dahabshiil iyo Salaam Bank oo keliya. Sida ay hadda tahay bangiyadu waa inay

20 Wareesi la yeelaney mas'uul ka mid ah MIQ, Desember 2018.

21 Wareesi la yeelaney madaxa IBS, Desember 2018.

bixiyaan lacago kale oo khidmo ah oo ay ka mid yihiin lacagaha warqadda ruqsada oo ah \$1000 laan walba sanadkii iyo \$20,000 sanadkii oo laga bixiyo Xarunta Guud.²² Bangiyadu waa inay laan walba oo cusub oo bangigu furto ruqsooyin cusub uga sameeyaan BDS iyo xafiiska DGS ee xaafadda; laamo bangi kuma yaallaan degaannada AS sababtoo ah BDS warqadaha ruqsada ma siiyo degaannada aysan dowladdu ka talin. Yeelkadeede, NISA ma aaminsana inay AS canshuurto amaba xataa canshuuro weydiiso bangiyada sababtoo ah bangiyadu waxay hayaani waa lacago ammaano ah, taasoo aan la canshuuri karin haddii la raaco sharciga Islaamka. Sidoo kale, AS canshuur kama qaaddo shirkadaha is-gaarsiinta, ilaa iyo inta ay NISA kala socoto.²³

Taaj: Xawaaladda ku xiraya lacagaha mobiilka iyo bangiyada

Magac-dheerida lacagaha mobiilka ayaa caawisey Taaj — waa shirkad lacag-bixinta ah oo ay leedahay shirkadda Hormuud — waxay gaartay koboc aan xad lahayn muddo afar sano ah. Taaj waxaa Febraayo 2013 laga aasaasay Koofurta iyo bartamaha Soomaaliya.²⁴ Iyadoo xiriirinta uga faa'iideysaneysa habka EVC+, ayey ku guuleysatay inay la wareegto 45% suuqa xawaaladda ee gobollada Koofureed iyo kuwa dhexe ee Soomaaliya. Lacagaha kayar \$300 waxaa si toos ah EVC+ loogu diraa lambarka telfoonka ee macmiilka haddii ay isku mid noqdaan magaca qofka lacagtu ku socoto iyo magaca EVC+ ku diiwaan gashan. Haddii aysan isku mid ahayn, waxaa lacagta loo soo diraa xawaalad ahaan halkaas oo ay tahay inuu qofku tago xafiiska xawaaladda si uu usoo qaato lacagtiisa. Qofka lacagta qaadanaaya waa inuu keeno ruqsada wadista baabuurta ama aqoonsi dowladeed si uu lacagtiisa u qaato haddii ay lacagtu \$1000 ka badan tahay. Haddii kale, waa inay keenaan qof damiir ka noqda oo isagu wata aqoonsiyada aan soo sheegnay. Aqoonsiyadu waa shardi marki lacag la dirayo. Lacagta la diray waxaa arki kara laan walba oo Taaj ah, waxaase bixin kara xafiisyada ay ku socoto oo keliya haddii aysan iyagu beddelin. Macluumaadka lacagta waxaa muddo sanooyin ah keydiya shirkadda; lacagihi dhowaan la isu diray waxaa gelli karaagaasimayaasha laamaha, kuwii horana maamulka sare oo keliya.

La dhaqanka xeerarka kala duwan

- 22 Wareesi la yeelaney madaxa IBS, Desember 2018.
- 23 Wareesi la yeelaney sarkaal sare NISA, Desember 2018.
- 24 Wareesi la yeelaney madaxa Taaj, Desember 2018.
- 25 Wareesi la yeelaney madaxa Hormuud, Desember 2018.
- 26 Wareesi la yeelaney madaxa Bangiga, January 2019.
- 27 Wareesi la yeelaney sarkaal sare NISA, Desember 2018.

Sharciyo kala duwan iyo heshiisyo wax xeeriya waxaa macnaheedu yahay inay ganacsiyadu xaalado jahawareer ah ku shaqeeyaan. Caqabadaha lala kulmi karo si loo maamulo shirkad ku taalla dal ay ka wada taliyaan maamullo iska soo horjeeda waxaa laga daalacan karaa dhibaatooyinka ay shirkadaha is-gaarsiintu wajaheen markii ay billaabayeen internet-ka mobiilka ah (**mobile internet**). Kaddib markii uu Edward Snowden shaaciyey inay NSA ay si qarsoodi ah u dhegeysato aaladaha leh internet-ka, ayaa waxay Al-Shabaab mamnuucday internet-ka mobiilka 2013. Hormuud, oo markaas ahayd bixiyaha keliya ee gobollada Koofureed iyo kuwa dhexe ee Soomaaliya siiya internet-ka mobiilka, ayaa waxay gobolladaas ka xirtay internet-ka mobiilka waxayse Muqdisho ku dhaaftay online. Al-Shabaab waxay si toos ah Hormuud u amartay inay sidoo kale Muqdisho ka xiraan internet-ka mobiilka.²⁵ Shirkadihi is-gaarsiintu waxay caasimaddi kusoo celiyeen **mobile WiFi** sanadkii 2015, iyagoo aan la tashan Al-Shabaab; waxba sharcidarro ma noqdaan haddii aan si cad loo mamnuucin.

La dhaqanka DGS

DGS ee Soomaaliya ayaa ganacsiyada ku heysa caqabadaha ugu waaweyn. Hoggaamiyeyayaasha DGS-yada oo dhan ayaa ka codsada bangiyada iyo shirkadaha is-gaarsiinta inay bixiyaan 'deeqo' lacageed oo lagu fuliyo mashaariic, sida uu sheegay maamule bangi. Diidmada bixinta lacagahaasi waxay sababtaa caddibaad iyo in la xiro laamo badan.²⁶ Culeyska arrintan waxay ka muuqataa markuu maamulku ku eedeeyay inay DGS ula dhaqmaan si ka foolxun AS/ISIS oo iyagu dila qaar ka mid ah shaqaalahoodi. Maadaama ay ku dhaqmidda sharcigu ku yar tahay DGS, waxay ganacsiyadi ku qasbanaadeen inay si toos ah ula macaamilaan qamarjiyaasha degaanka oo weliba 'deeqo' lacageed ku biiriyaan jeebabkooda.

La dhaqanka Al-Shabab iyo Dowladda Islaamiga Soomaaliya

Nationlink iyo Olympic (oo hadda loo bixiyey SomTel) ayaa xiriirrada ugu xun la leh kooxaha Islaamiga oo dhan, oo ay ku jirto AS.²⁷ Sidoo kale, Hormuud iyaduna lama lahan xiriir wanaagsan AS: waxay shirkaddu qasaartay malaayiin doollar markii ay kooxdu mamnuucday adeegyadoodii internet-ka mobiilka. NISA waxay u marqaati kacday inay

shirkadaha is-gaarsiintu aysan la shaqeyn AS; tusaale ahaan, sanadkii 2013, waxay AS weydiisatay Hormuud inay siiso xogaha EVC-yada ee xubnihii hore ee AS; markii ay Hormuud diideyna, waxaa la amray inay xiraan 57 anteenno oo surnaa gobollada Koofur-galbeed ee Soomaaliya.²⁸ Isla ilahaas ayaa sheegaya inay ganacsiyada waaweyni adeegsadaan habab gacan saddexaad ah oo ganacsato kale ka codsadaan inay iyagu u tagaan madaxda AS kana dhaadhiciyaan in aysan dhaawicin ganacsiyadooda.

Sidey ahaataba, waxaa suurogal ah inay jiraan shakhsiyaad iyagu xogaha la wadaaga AS; lamase xaqiijin karo inay taasi jirto. Maadaama ay shirkadaha is-gaarsiintu diiwaan geliyaan dhaqdhaqaaqa shaqaalahooda, ayaa waxay tani shaqaalaha ka duweysaa inay xog la wadaagaan AS. Habka dhowrista xogaha ee shirkadaha is-gaarsiinta iyo bangiyada ayaa xaddideysaa xogaha ay shaqaalaha hoose la wadaagi karaan AS. In aysan suurogal ahayn ayey u dhowdahay inay xogaha bangiyadu gacanta u galaan AS sababtuna ay tahay hababkooda ad-adag ee dhexmaquurka xogaha; **Laguma oga AS inay heshay xogaha bangiyada.**²⁹ Si kastaba, maadaama qaar ka mid ah xogaha lacagaha xawaaladaha iyo kuwa mobiillada ee degaannada geeri go'anka ah ay dhexmaquur u yeelan karaan shaqaalaha hoose, ayaa waxaa suurogal ah welibana u badan tahay inay shakhsiyaad la jira AS ay dhexgalaan una adeegsadaan la socoshada dadka ay beegsanayaan — tusaale ahaan, inay isha ku hayaan koonto lacageed oo mobiil ah oo la hubo inay dowladdu leedahay oo ay dhaq-dhaqaaqeeda dabo galaan si ay u gartaan saraakiil kale amaba basaasiinta ku sugan degaannada AS. Waxaa kaloo ay AS u adeegsan kartaa la socoshada xubnaheeda sameeya dhaq-dhaqaaqyada lacageed ee laga shakiyo.

NationLink: cashar ku saabsan saameynta xiriirka xun ee lala yeesho Islaamiyiinta

Nationlink (NL) waxay ku aflaxday Muqdisho, iyadoo ku guuleysatay inay xiriirro wanaagsan ka sameysato xuduudaha qabaa'ilka. Si kastaba, wuxuu burburkeedi billowday sanadkii 2006 markii uu Midowga Maxaakimta Islaamku (MMI) awoodeystay shirkadduna ay ku fashilantay inay xiriir la yeelato awoodaha Islaamiyiinta. Shirkaddu waxay guulaha MMI u aragtay kuwo dib u riday hawlaha, waxayna shirkaddu aaminsan tahay inay kooxaha Islaamiyiintu naas nuujiyeen shirkado kale. Sanadkii 2009/10 shirkadda NL waxay ku sigatay in gebigeedaba la xiro **cadaadis uga yimid AS dartiis; shirkadda waaba la wada xiri lahaa markii ay AS ka baxday Muqdisho**

2011. Inta badan shacabkii caasimadda markii ay u qaxeen daafaha magaalada waxaa shirkadihi ku qasbanaadeen inay dhismayaal cusub ka dhistaan ama ka ijaartaan degaannadii cusbaa. Dhaqaalihii ku lumay magaalada la faaruqiyeey ayaa sii cusleeyey wada shaqeyn xumadii ay la yeesheen kooxihi hubeysnaa, taasoo iyana sii dhaawacday awooddoodi ay si degdeg ah dhismayaal uga dhisan lahaayeen degaannadii dhowaan lasoo degey. Xaaladdi weyba sii xumaatay kaddib markii ay AS dishey toddobo ka mid ah shaqaalaha NL oo ay weliba damacday inay mamnuucaan shirkadda dhan; shirkadihi kale ayaa AS la hadlay si ay u joojiso xayiraadda, iyagoo ka baqaya inay taasi iyaga kusoo jeedisoo indho aan loo baahneyn.³⁰ NationLink waxay weli kasoo kabaneysaa dagaalkii 2009/10; waxay halkaas tiradii badneyd ee macaamiishooda u lumisey Hormuud iyo SomTel. AS waxay kusoo rogtay NL inay ayaga oggolaansho ka hesho si ay baabuurtooda farsamada ugu dirto xallinta cilladaha farsamo ee ka dhaca goobaha fogfog, taasoo iyana sii liicisey awooddii ay shirkaddu ku ahaan lahayd mid shaqeysa. AS waxay mamnuucday hab internet offline ah oo ay NL lahayd kaasoo adeegsanayey hab SMS ah oo loogu xirmayo Twitter iyo Facebook sanadihii 2014/5.

Soojeedin

1. Shirkadaha is-gaarsiintu waa inay kusii adkeeyaan saraakiisha laamaha inay dhexmaquur u helaan lacagaha mobiilka iyo liiska wicitaannada. Waa inay sidan sameeyaan ayagoo adeegsanaya habka lambarka SIRTAA ee Salam Bank: lambar sir ah ayaa loosoo dirayaa macmiilka si uu u xaqiijiyo inuu isagu doonayo helista macluumaadkiisa; lambarka sirta oo keliya ayaa macluumaadka lagu heli karaa.
2. Koontooyinka mobiilka ee lacagaha waaweyn amaba kuwa aan xadka lahayn waa in loola dhaqmo sida koontooyinka kale ee bangiga. Shakhsiyaadka doonaya inay xawilaan lacago aad u badani waa inay caddeeyaan ujeeddadada iyo halka ay ka timid lacagtaasi — shirkadaha is-gaarsiinta waa inuu caymiyo xeerka AML/CFT, waana inay raacaan hab-maamuleedka ay dejisey FRC.
3. Iyadoo la tixraacayo waxa kor ku xusan, waa in shirkadaha is-gaarsiinta lagu daro guddiga ilaalinta sharciyada, oo hadda ka kooban bangiyada, FRC, CBS, iyo FSVC (financial service **voluntary** corps).
4. FRC iyo BDS waxay labaduba u baahan yihiin tababbarro fiican iyo khuburo si ay u uga soo baxaan masuuliyadahooda dayacan.

28 Wareesi la yeelaney sarkaal sare NISA, Desember 2018.
 29 Wareesi la yeelaney sarkaal sare NISA, Desember 2018.
 30 Wareesi la yeelaney sarkaal sare NISA, Desember 2018.

5. FRC waa inay qeexdo waxa ay yihiin lacag is-dhaafsiyada shakiga leh. Bangiyadu waxay sheegayaan in aysan caddeyn inta jeer iyo inta maalmood ee uu qof soo noqnoqonayo si lacagaha ley dhaafsanayo loogu aqoonsado inay yihiin kuwo shaki abuuraya.

6. Shacabka waa in laga dhowro hawlaha FRC haddii kale waxay taasi dhaawacaysaa hawlaha bangiyada.

7. Bangiyadu way hayaan lacagaha loo dhiibto 80%-90% waxayna amaah u bixiyaan 10-20 boqolkiiba oo keliya. Tan waxaa sabab u ah in uusan BDS ku qasbin bangiyada inay lacag cayiman amaahiyaan dadka deymaha raba. Waa inay BDS tallaabadaas qaaddo si loo kordhiyo wareegga lacagaha caddaanka ah iyo fursadaha abuurista ganacsigaba.

8. Ma jiro sharci xeerinaya dhowrista xogaha; waa in la meel mariyo sharciga dhowrista xogaha si xogaha guud iyo kuwa gaarba looga ilaaliyo waxa aan ahayn dowladda.

9. Sidoo kale, ma jiro sharci xeerinaya keydinta xogaha; hayadaha ganacsigu waxay xogta u ururiyaan sababo ganacsi awogood oo keliya. Marka waa inay dowladdu qeexdo muddada ay tahay inay xogta hayaan bangiyada iyo shirkadaha is-gaarsiintuba.

10. Maamulayaasha bangiyada iyo dowladda waa in loo tababaraa sharciyadaas cusub iyo hab-maamuleedyada haddii kale hab-maamuleed aan tababbar wadan wuxuu noqonayaa khasaaro.

11. Tababbar maamul-raac ah oo uu Bangiga Adduunku siiyey FRC waa in sidoo kale ay bangiyadu iyana helaan maadaama ay yihiin kuwii fulin lahaa.

12. Kaarka Aqoonsiga Qaranku waa muhimad u baahan in la sameeyo si loo maareeyo oo loola socdo isticmaalka.

13. Habka Go AML waa in FRC laga hawlgeliyo si looga caawiyo wanaajinta shaqooyinkooda.

14. Dowladdu waa inay kordhiso amniga oo ay hubiso inay gaarsiisan tahay meel walba oo dalka ka mid ah maadaama ay bangiyadu yihiin kuwa ugu badan ee ku qasaaraya dowladnimada daciifka ah.

15. Si loo fuliyo sharciga shirkadaha is-gaarsiinta isla markaasna loo sii heysto adeegyadooda Soomaaliya oo dhan, waxaa maamulka dowladda daruuri u ah inay kusii fiddo degaannada ay hadda maamusho Al-Shabaab.

16. Si loo dhiirrigeliyo isku xirnaanta, waa in sharciyada aammindarrada la meel mariyo si bangiyada loogu qasbo inay aqbalaan isku xirka shirkadaha lacagaha mobiilka oo dhan; habka hadda jira wuxuu abuurayaa xaalad ay shirkado tiro yari eryi doonaan shirkadaha is-gaarsiinta iyo bangiyada, natiijaduna noqoneysa mid aan midkoodna u wanaagsaneyn.